Sidee ayaa Aniga iyo Qoyskeyga Isugu Diyaarin Karnaa Xabsi dhigidda ICE?

- Waxaad hubsataa in maclumaadka iyo lambarada xaaladaha degdegga ah marka ay jiraan lala xiriiro oo dugsiga ilmahaada iyo xafiiska daqtarkaadu ay saxan yihiin, kuwaas oo ku jiro qofka dugsiga kasoo qaadi karo ilmahaada iyo qofkaan kasoo qaadi karin
    - Waxaad hubsataa inay ilmahaagu ogyihiin qofka aan dugsiga kasoo qaadi karin, iyo qofka u daryeeli doono
    - Hadii uu jiro qof ay maxkamada amarka fogeynta kaaga ilaalinayso, hubso inaad koobi aad ka siisid dugsiga
    - Waxaad qortaa tilmaan hadii uu cunugaada leeyahay xanuuno iyo/ama uu qaato daawooyin waxaad na siisaa koobi dugsiga iyo qofka daryeeli doono

- Waxaad la kulantaa garyaqaan si uu kuugu hagaajiyo warqad siinayso Awooda Wakaalada qofka aad dooratay oo daryeeli doono cunugaada oo gaari doono go'aamo maaliyadeed, sharciyeed ama daryeelka ilmaha intaad maqantahay
- Waxaad hubsataa in ay ilmahaaga dhan leeyihiin baasaboor
    - Waxaad ka heli kartaa xafiiska qunsuliyadda
- Ka la hadal saaxib ama xubin ka mid ah qoyskaada oo si sharci ah ku deggan Maraykanka sidaad ku heli kartid lacagta kafaalada socdaalka
    - Kafaalada micneheedu waxay tahay xaakinka ayaa lacag kooban oo maxkamadda lagu bixinaayo kuugu soo daynayo ilaa markii lagaaga baahdo inaad timaado maxkamadda
    - Lacag kaydi hadii ay dhacdo in laguu ogolaado kafaalada. Kafaalada ayaa u dhexeyso $7,000 - $15,000
- Waxaa laga yaabaa in laguu ogolaado hal telefoon oo keli ah xabiska intaad ku jirto – laakin xifdi lambarada muhiimka oo **dhan**.
    - Markaad telefoonka dirtid, hubso inaad qofka u sheegtid:
        - Xabiska aad ku sugan tahay
        - Lambarka Aqoonsigaada#
        - Lambarka A#
        - Taarikhda Dhalashadaada
    - Sidoo kale waydiiso inay kuu wacaan garyaqaan kaada.
    - Xubnaha qoyska ayaa ka isticmaali karo qalabka helitaanka qofka xiran halkaan: https://locator.ice.gov/odls/homePage.do

Hel Garyaqaan Waayo Arag Ah!

Iska ilaali Khiyaamada!

- Hadii aad u baahantahay talo sharciyeed oo ku saabsan arrimaha socdaalka, hubso qofka kuu kaalmaynaayo inuu yahay mid sharciyaysan inuu ku siiyo talada sharciga
- Garyaqaan ama wakiil la aqoonsanahay oo u shaqeeyo Guddiga Rafcaanka Socdaalka ama Board of Immigration Appeals-oo ah hay'ad la aqoonsahay oo keli ah ayaa ku siin karo talo sharciyeed
- **Inuu shakhsiga ahaado "notario público" ayaa xaq u siinaynin inuu ku siiyo talo sharciyeed**
- Hadii aad leedahay taariikh dambiilenimo, hubso inuu garyaqaan kaada leeyahay waayo aragnimo iyo aqoon khaas ah oo ku saabsan saamaynta dembiyada ku yeelan karto socdaalka
- Waxaa bulshada ka jiro kutiri-kuteen badan; ha isu haleynin kutiri-kuteenta iyo ballanta beenta

Tashiga Socdaalka ah ee lala samayn doono Garyaqaanada oo Bilaashka ah

Kiis magan raadin ah, ama inaad ka war heshid qof xiran, waxaad ka wacdaa PAIR halkan 617-742-9296

Su'aalaha kale:

Xafiiska Duqa Magaalada Boston, 1 City Hall Plaza, 12:00 galab-2:00 galab Arbacada 1aad iyo 3aad ee bil walbo, (617)635-2980

Irish International Immigrant Center, Wac (617)542-7654 si aad u heshid in ay jirto xaruun kuugu dhaw

Ogaaw Xuquuqdaada!

Hadii ay ku joojiyaan saraakisha socdaalka ama booliska:

- U dhiib kaarkan saraakilka, oo aamus..
- Kaarka ayaa sheegayo inaad xuquuqdaada aamusnaanta ah isticmaalayso oo aad ku diidayso inaad wax su'aalo ah ka jawaabtid ilaa aad la hadashid garyaqaankaada.

To: Immigration or Other Officer

Right now I am choosing to exercise my legal rights.

- I will remain **silent**, and I refuse to answer your questions.
- If I am detained, I have the right to contact an attorney **immediately.**
- I refuse to sign anything without advice from an attorney.

Thank you.

Ogaaw Xuquuqdaada

98 North Washington Street, Suite 106 Boston MA 02114

(p)(617)742-9296
(f) (617)742-9385

Xuquuqdaada – Gurigaada markaad ku sugan tahay

Waxaad xaq u leedahay inaad:

- Albaabka aad furin
- Aamusnaato oo aad su'aalaha oo dhan ka jawaabin
- Kaarkaada "Know Your Rights" albaabka hoostiisa uga dhiibtid
- Codsato inaad aragtid warqada sharciga oo albaabka hoostiisa lagaaga soo dhiibo ama daaqada lagaa tusiyo a window
- **Hubso in warqada sharciga uu saxiixay XAAKIN**
- Waxaad u diidi kartaa ICE inay soo galaan gurigaada hadii ay wadanin warqada sharciga uu saxiixay xaakinka.
- Wacdo muwadin Maraykanka ee saaxibka ama xubin ka tirsan qoyskaada ee usheeg waxa dhacay
- Wacdo garyaqaan socdaalka ee waayo aragnimo leh



Xuquuqdaada – Gurigaada Dibadiisa

Markaad ku sugan tahay baaburka, wadada, bulshada, goobta shaqada, waxaad xaq u leedahay:

- Inaad aamusnaato. Micneheeda waxa waaye xaq ayaad u leedahay inaad su'aal oo dhan aad ka jawaabin
  - Been ha sheegin. Waxaa dhaantaa inaad aamusnaato intaad been sheegi lahayd
- Waydi inaad xabis tahay ama aad xor u tahay inaad tagtid. Hadaad xor u tahay inaad baxdid, **codso inaad baxdid**
- Garyaqaan. **Codso inaad wacato garyaqaan**
- Inaad diido in faraha lagaa qaado

Is daji. Ha cararin ama ha diidin xiritaanka. Gacmahaada meel uu askariga ka arkaayo dhig.

Inaad aamusnaato micneheeda ma ahan in lagu xiri doonin, laakin waa xaqaada inaad siinin ICE maclumaad ay adiga kuugu isticmaali doonaan.

- ICE ayaa u baahan maclumaad sheegayso halkaad ka timid si ay maxkamad socdaalka ah ku hor geeyaan.
- Baasaboorkaada ayaa cadayn ugu filan ICE qofkaad tahay iyo halkaad ka timid. **Hadii aad lahayn degenaanshaha sharciga ah, <u>ka fakir halkaad dhigi lahayd aqoonsiga ajnabi sida baasaboor, sharciga baabuurka, aqoonsiga dalka, iwm.</u>**

Hadii aad xuquuqdaada sheegatid oo lagu xadgudbo, waxaad taasi kaga faa'iidaysan kartaa maxkamada socdaalka hadii lagu xiro.



Habka aad isu diyaarin karto hadii ay ku xiraan ICE

- Waxaad xaq u leedahay inaad maclumaad oo dhan *aad* siinin saraakiisha ICE <u>khaas ahaan na dalka aad ka timaaday</u>
- Hadii aad leedahay xubno qoyskaada o aan sharci lahayn, kula tali inay kusoo *booqanin*
- Wac garyaqaan socdaal leedahay taariikh dambiilenimo, hubso inuu garyaqaan kaada leeyahay waayo aragnimo iyo aqoon khaas ah u leeyahay arrimaha dembiga

Hadii aad Leedahay Taarikh Ballan ee Maxkamadda: <u>Maxkamadda aad</u>

- Hadii aad aadin ballan maxkamadda aad lahayd, waxaa ammar lagu bixin in lagu saaro sidoo kale na ammar xarig. Xaq uma yeelan doontid kafaalada.
- Ammarka talxiirka ayaa ah wax mar walbo laguugu xariirin doono, xitaa hadii taarikhda makamadda ay ahayd toban sano oo lasoo dhaafay
- Hadii aad garyaqaan lahayn taarikhda maxkamadaada hore, waxaad codsan kartaa waqti dheeraad ah aad ku heshid
- Maxkamadda socdaalka markaad ku sugan tahay, **<u>waxaad xaq u leedahay in garyaqaan ku matalo</u>** laakin waa inaad raadsato garyaqaan kaada, inta badan garyaqaanka **bilaash ma ahan.** Codso liiska garyaqaanada bilaashka ah ama kuwa ku shaqeeyo lacagta yar

Lambarada Muhiimka ah oo dhan Xifdi